

Sii-bixin Daawooyin Dhakhtar Qoray

Shahaaddooyinka Sii-bixin Daawooyin Dhakhtar Qoray (Prescription Pre-payment Certificates) (PPCs) waxay gargaaraan dadka u baahan tiro badan oo ah daawooyin, ama daawooyin joogto ah qaata si kharashka loo yareeyo marka aanay siyaabo kale xaq ugu lahayn daawooyin dhakhtar soo qoray oo bilaash ah. Shahaaddooyinka PPC waxa la helaa iyaga oo ah 4 bilood ama sannad.

Shahaado PPC waxay kuu dhigi doontaa lacag haddii aad si joogto ah ugu baahan tahay wax ka badan 1 daawo dhakhtar soo qoray bishii.

Waxa aad codsan kartaa shahaado PPC:

- adiga oo isticmaalaya barta internetka ee www.ppa.nhs.uk
- adiga oo boosta isticmaalaya oo buuxinaya foomka FP95 ee laga heli karo farmasiga xaafaddaada.
- adiga oo tagaya farmasi u diiwaansan iibinta shahaaddooyinka PPC
- adiga oo isticmaalaya teleefon – eeg faahfaahinta ku taala hoos

Waxa aad hubin kartaa qiimaha PPC ama mid baad teleefonka ku iibsana kartaa adiga oo wacaya:

0845 850 0030
(wicitaanada kharashkoodu waa qiimaha degmada)

Soo-celin Lacag

Haddii aad hore u sii bixisay kharashka NHS, waxaa laga yaabaa in lagu soo celiyo qayb ama dhamaan lacagtaadii. Waa in codsiyada lagu sameeyo gudaha saddex bilood laga bilaabo taariikhda aad bixisay kharashka. Si aad u codsatid soo-celin lacag, waxa aad caadi ahaan u baahan tahay inaad buuxisid foomka HC5 soo raacisid risiidhka. Foomka HC5 ayaa taa ka bixinaya faahfaahin dheeraad. Waxa aad foomka HC5 ka heli kartaa:

- xafiiska degmadaada ee Jobcentre Plus
- cisbitaalka degmadaada
- dhakhaatiirta ilkaha iyo muraayad-yaqaanada qaarkood
- www.ppa.nhs.uk - boosta ayaa laguugu soo diri doonaa
- adiga oo ka codsanaya Adeegyada Bukaanka (Patient Services) oo leh lambarka:

0845 850 1166

(wicitaanada kharashkoodu waa qiimaha degmada)

Haddii aad bixisid kharashka daawooyinka dhakhtar soo qoray oo aad u maleynaysid inaad rabtid inaad codsatid soo-celin lacag, weydii farmasiilaha inuu ku siiyo risiidh NHS (foomka FP57) marka aad bixinaysid kharashka. Waxa kaliya ee aad heli kartaa risiidh marka aad bixinaysid kharashka. Risiidhku waxa uu kuu sheegayaa waxa aad u baahan tahay inaad sameysid si aad u codsatid soo-celin lacag.

Adeegyada Turjubaanka

Haddii Ingiriisigu usan ahayn afkaaga koowaad, waxa aynu bixin doonaa adeeg turjubaan oo teleefonka la isticmaalayo oo laga helayo dhammaan lambarada.

Taasi waxay caadi ahaan qaadataa inta u dhexeysa 30 ilbiriqsi ilaa hal daqiiqo.

Baahida kale ee gaarka ah

Waxa kale oo qoraalkan yar lagu heli karaa farta indhoolaha (braille), cajalad maqal ah, disk iyo xuruuf waaweyn haddii la codsado.

Dhammaan lambarrada teleefonka ee ku qoran qoraalkan yar waxay oggolaanayaan Tynetalk ay isticmaali karaan dadka dhagaha culus. Waxaa tan la helaa Isniin ilaa Jimce 8 subaxnimo ilaa 6 galabnimo.

Kani ma aha tilmaan-bixiye buuxa oo ku saabsan gargaarka la heli karo. Si aad u heshid war sii faahfaahsan, soo qaado qoraalka yar ee HC11 ee laga helo cisbitaalada NHS. Waxa kale oo laga helaa farmasiyada, xarumaha Dhakhaatiirta Guud (GP) iyo muraayad-yaqaanada qaarkood.

Ama, tag rugtan internetka ee soo socota isticmaalna barta baadhitaanka si aad u heshid qoraalka yar:

www.dh.gov.uk

Beddel ahaan, si aad u heshid la-talin dheeraad ah, ama si aad u heshid foomka sheegashada soo-celin lacag (HC5), wac lambarka khadka gargaarka ee soo socda lana hadal la-taliye:

0845 850 1166

(wicitaannada waxaa la isaga qaadayaa qiimaha gudaha)

© Crown copyright 2005.

Waxa loo soo saaray Wasaaradda Caafimaadka (Department of Health).

HC11QG V02 1M

HC11QG

NHS

Gargaar Xagga Kharashka Caafimaadka Tilmaan-bixiyaha Fudud ee HC11

Tilmaan-bixiyahani waxa uu sharraxayaa gargaarka la heli karo ee ku saabsan kharashkan iyo adeegyadaan NHS ee soo socda:



Daawooyin Dhakhtar Soo Qoray



Daaweynta Ilkaha



Baaritaannada Indhaha



Muraayadaha indhaha ama lensiska indhaha



Taageerooyinka Timaha Artifishalka ah iyo Maro ah



Safarka lagu tagayo daaweynta NHS ee hoos timaadda dhakhtar

Tilmaan-bixiye Fudud

Dadka Da'da Yar iyo Dadka Qaata Gargaar (Benefits)

Ma jirtaa 16, 17 ama ma tahay 18 kuna jirtaa waxbarasho wakhti buuxa?

Haddii jawaabtu tahay HAA, waxa aad markaa xaq u leedahay waxyaabahan iyo adeegyadan NHS ee socda oo lacag la'aan ah:

Daawooyin NHS oo dhakhtar soo qoray

Daaweynta ilkaha ee NHS

Baadhitaano indhaha ah

Timaha Artifishalka ah iyo Taageero Maro ah NHS

Waxa kale oo aad xaq u leedahay foojaro loogu talagalay muraayadaha ama lensiska indhaha

Haddii adiga (ama wehelkaagu haddii leedahay mid) qaato:

- Taageero Dakhli
- Gunnada Shaqo Doonaha ee ku Salaysan Dakhliga
- Lacagta ka soo noqota Hawlgabka **Kayd la Hubo; ama**
- aad haysatid Shahaaddada Canshuur ka Dhaafidda NHS

Waxa aad markaa xaq u leedahay dhamaan waxyaabaha / adeegyada kor ku qoran IYO:

In lagu soo celiyo kharashka caqli-gal ah ee ah kharashka safarka ku aad ku tagtay daaweyn hoos timaada dhakhtar cisbitaal

Si aad u sheegatid xaqaa aad leedahay, u sheeg dhakhtarka marka lagu daaweynayo inaan lagaa rabin inaad lacag bixisid. Dhakhtarku waxa uu ku weydiin doonaa cadeyn inaan lagaa rabin inaad lacag bixisid waxana uu ku weydiin doonaa inaad saxeedid foom.

Fiiro: Haddii aad qaadatid gargaar (benefit) aan ku qornayn kor, waa inaad eegtid inta ka harsan qoraalka yar si aad u ogaatid haddii aad xaq u leedahay gargaar.

Dadka leh Xaalado Caafimaad Qaarkood

Haddii aad qabtid mid ka mid ah xaaladahan caafimaad ee soo socda, codso shahaadada NHS Medical Exemption Certificate oo kuu oggalaanaysa inaad lacag la'aan heshid daawooyinka dhakhtar soo qoray ee NHS. Xaaladaha kaa reebaya kharashka waa:

Hypoparathyroidism (Qanjidhada qoorta oon hawl fiicnayn)

Hypoadrenalism (cilad qanjidh kalyo) oo lagama-maarmaan ka dhigaysa daaweyn beddelaad ah oo gaar ah (sida Cudurka Addison)

Sonkorta nooca 'Diabetes insipidus' iyo noocyo kale

Hypopituitarism oo ah hawl yaraan qanjidh maskaxeed

Sonkorta nooca 'Diabetes Mellitus' marka laga reebo xaaladda

cunto kaliya lagu daaweeyo

Myasthenia Gravis

Myxoedema (oo ah Shaqo-yarida Qanjidhka Qoorta (Hypothyroidism) oo u baahan beddelaad hormoonka qanjidhka qoorta)

Qalal (epilepsy) si joogto ah ugu baahan

Daaweynta ka-hortagga gariir

Nabar joogto ah (Fistula) oo u baahan faashad-saarid joogto ah ama u baahan qalab

Waxaa kale oo uu kuu bannaanaan karaa haddii aad leedahay naafo jidh oo joogto ah oo keenaysa inaanad awoodin inaad guriga ka baxdid adiga oo haysta qof ku gargaara mooyane.

Si aad u codsatid shahaado, weydii foomka codsiga soo-dhaweyaha jooga xafiiska dhakhtarka, waxaana kuu saxeexi doona qof ka tirsan shaqaalaha xafiiska dhakhtarka. Xafiiska dhakhtarku waxa uu codsiga u diri doonaa Adeegyada Bukaanka (Patient Services) ee Newcastle waxaana aad shahaadaada heli doontaa gudaha 14 maalmood ka dib marka xafiiska dhakhtarku diro foomka.

Dadka Jira 60 ama ka Weyn

Haddii aad jirtid 60 ama aad ka weyn tahay waxa aad xaq u leedahay inaad heshid:

Daawooyin NHS oo Bilaash ah

Baadhitaano Indhaha oo ah NHS oo Bilaash ah

Dumarka uurka leh iyo kuwa umulay 12-kii bilood ee ugu dambeeyay gudahooda

Waxa aad xaq u leedihiin inaad heshaan:

Daawooyin NHS oo Bilaash ah

Daaweyn ilko ah NHS oo bilaash ah

Si aad kuwaa u heshid, waxa aad u baahan doontaa inaad codsatid shahaaddada NHS Maternity Exemption Certificate.

Foomamka codsiga waxa laga helaa Dhakhtarkaaga Guud (GP), ummulisada ama booqdaha caafimaadka. Waxay kaa gargaari doonaan inaad buuxisid foomka waxaana ay u diri doonaana Adeegyada Bukaanka (Patient Services) ee Newcastle. Waxa aad shahaadaada heli doontaa gudaha 14 maalmood.

Dadka Leh Dakhli Hoose

Haddii aanad ka tirsanayn midna kooxaha lagu sheegay qoraalka yar, laakiin dhibaato kaa haysato bixinta kharashka NHS, waxa laga yaabaa in gargaar kuu banaanado marka la eego Barnaamijka Dadka Dakhliga Yar ee NHS (NHS Low Income Scheme). Kani waa barnaamij dakhliga la xidhiidha oo eegaya baahidaada (iyo ta wehelkaaga) todobaadki iyo dakhligaaga si loo xisaabiyo inta lagaa rabo inaad ka bixisid kharashka caafimaadkaaga (haddii wax lagaa rabo).

Dakhliga ugu hooseeya ee gargaar buuxa Barnaamijka lagaga heli karo dhawaan ayaa la beddelay, sidaa daraadeed haddii aanad in mudo ah codsi sameyn, waxa fiican inaad sameysatid codsi cusub.

Haddii aad doonaysid inaad gargaar codsatid adiga oo isticmaalaya Barnaamijka Dakhliga Hoose (Low Income Scheme), foomka HC1 ka soo qaado dhakhtarka ilkaha, muraayado-yaqaanka ama xafiiska Dhakhtarka Guud (GP) ee xaafaddaada.

Waxaa kale oo aad heli kartaa foomka, la-talin ku saabsan buuxintiisa, ama war iyo la-talin guud haddii aad soo wacdid khadkayaga gargaarka oo ah:

0845 850 1166

(wicitaannada waxaa la isaga qaadayaa qiimaha gudaha)